

Phone: 0409551763  
Fax: 9487 9230  
Email:  
[cmag@mcm.org.au](mailto:cmag@mcm.org.au)  
Website:  
<http://www.cmag.org.au>



Auspiced by



North West Disability Case Management Action Group

## Kitka Macluumaadka Iinta ee CMAG

Kooxda Case Management Action Group (CMAG) waa hay'adaha maaraynta xaalladaha iinta ee guud, badanaana, ka shaqeeya qaybta Waqooyiga iyo Waqooyi Galbeed ee magaalaweynta. Hadda, CMAG waxay leedahay xubno ka kala socda 45 hay'adood oo kala duwan kuwaas oo ay ka mid yihiin kooxda maaraynta xaallada iinta, caafimaadka bulshada, kooxaha daryeelayaasha iyo kaalmada isticmaalaha adeega iyo kooxaha tala-siinta.

Sanadii 2005, CMAG waxay carab-baabtay baahi macluumaad oo bartilmaameed noqonaysa, cid muhiima oo lala xiriirayo iyo istaraatiijiyo khaasatan heerar lagu caawimayo dadka ku jira safka sugitaanka si looga maamulo nadaamka adeega qaybta waqooyi. Sanadii 2008, kitkii macluumaadka ee CMAG dib ayaa loo eegay, waana la cusboonaysiiyey waxaana lagu daray macluumaadka dadka ku nool xaafadaha Galbeedka.

### **Macluumaadka yaa leh?**

Macluumaadka ku yaalla xaashiyaha waxaa loogu talagalay dadka iinta leh iyo/ama qoysaskooda iyo dadka ku cusub nadaamka adeega iinta ama raadinaya macluumaad siyaada ah. Kani maaha inuu bedelo adeegyada kale sida maaraynta xaallada, laakiin in dadka la siiyo fursada ay ku helli karaan iyo in si madax banaan loogu awood geliyo haddii sidaas la rabo.

### **Qorshaynta macluumaadka xaashiyaha**

Macluumaadka kitka ku jira waxaa loo qorsheeyey dhowr heer oo isbedelka nolasha qofka. Macluumaadku wuxuu khuseeyaa kooxaha soo socda:

- |           |                                   |
|-----------|-----------------------------------|
| 1.1 – 1.4 | 0 ilaa da'da dugsiga              |
| 2.1 – 2.5 | Dadka dhalinta yar                |
| 3.1 – 3.6 | Dadka korran                      |
| 4.1 – 4.8 | Macluumaadka khuseeya dhamaantood |

## **Sida loo isticmaalo Kitka**

Macluumaadka lagu so ururiyey xaashiyahaan waa la sii kala jejebiyey si uu u daboollo inta badan macluumaadka looga baahan yahay heerarka nololeed ee muhiimka sida u doorashada macluumaad dusgi wixii khuseeya xalalka waxay helli karaan dadka korani.

## **Aqoonta macluumaadka xaashiyaha ku yaalla**

Haddii aad u qaybinayso macluumaadkaan dadka kale waxaa laga yaabaa inaad adigu akhrido si aad adigu ula qabsato wuxuu ka kooban yahay. Kaasi wuxuu kaa caawimayaa inaad bixiso macluumaadka ugu haboon.

Haddii aad jeclaanlahayd inaad ka hadasho macluumaadka fadlan ku niyad samow inaad wacdo 03 94879213 si aad ula hadasho xiriiriyaha CMAG.

## **Maxaa dhacaya haddii macluumaadka xaashidu aanu ka jawaabin su'aasha?**

Haddii macluumaadka aad doonayso aan xaashida lagaga hadlin fadlan u xawil qaybta weyn oo khusaysa. Waxaa jirta xaashida liiska guud oo cidda lala xiriirayo lagana yaabo inay ku caawinto.

Dhamaan xaashiyaha waxaa laga helli karaa online-ka websaytyada soo socda:

<http://www.disabilityconnections.org.au> (riix CMAG Disability Information Kit)

<http://www.respitenorthandwest.org.au> (riix Disability Information Kit 0 – Adult)

<http://www.cmag.org.au> (shaqaa socota – websaytka weli ka socdaa – daawo bartaan)